



# Dugsiyada Degmadu Waxay Ku Dhawaaqayaa Jadwalka Taariikhda Sanad-Dugsiyeedka 2021-2022 ee Iskuulada PPS

Abriil 28, 2021

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Waxaan wali dhammeystireynaa qeybo ka mid ah faahfaahinaha dhiman, laakiin waxaan rabnaa inaad ogaato in xalay, Golaha Waxbarashadu ay ansixiyeen jadwalka taariikhda 2021-22.

Qoysaska caruurtooda noqon doonto ardaya fasalada 1aad ilaa 12naad sanad-dugsiyeedka soo socda, waxaad calaamadin kartaa maalinta Arbacada, Sebtembar 1deeda inay tahay maalinta ugu horeysa fasalada waxbarashadu bilaabmi doonaan. Haddii aad leedahay arday noqon doona xannaanada caruurta, maalintaada ugu horeysa ee si rasmiya ahi waa Arbacada, Sebtembar 8deeda iyada oo ay jiri doonta hawlaha “kordhinta” laga bilaabo Sebtembar 1deed ilaa 7deeda taasi oo iskuulka ardaygaagu kula soo xiriiri doono. Maalinta ugu dambeysa fasalada waxbarashadu ee xannaanada caruurta waa 11 oo noqon doono maalin Jimce ah, Juun 10, 2022.

Halkan iyada oo dhammyestiran [2021-22 PPS calendar](#) (ayaa laga helayaa laguna turjumay dhammaan luqadaheena aan taageerno)

Sida Guddoomiyaha Waxbarashada ee Guerrero uu sheegay, waxa ay tahay rajadayada inaanu si buuxda dib ugu furno iskuulada todobaadkii shan maalmood oo ay ardaydu waxbarashadooda ku qaadan doonaan fasalada iskuulada xilliga dayrta. Ballan qaadkani waxaa kaliya naga hor istaagi kara oo kaliya iyada oo xaaladaha caafimaad iyo tilmaamaha caafimaadka dadweynaha iyo saraakiisha Waaxda Caafimaadka ayna oggolaan, waxaan rajeyneynaa iyada oo aan ku talo jirno inaan soo dhaweyno dhammaan ardaydu inay ku soo noqdaan iskuulada bishan Sebtembar.

Waxaan ka warqabnaa in jadwalka taariikhdu uu ka soo daahay waqtigii caadiga ahaa sidaas awgeed waxaan idiinka mahadcelineynaa dulqaadkiina iyo fahamkiina. Waxaan sii wadi doonaa inaad idinla soo socodsii no wixii cusub oo faahfaahsan ee aad loo rajeynayo sanad-dugsiyeedka 2021-22.

Mahadsanidin.